Indhoweydba jiinleyda gabay waan ka jiifsadaye.

Uma jeensan beelaha jinnigu, jiitinta u rogaye.
Aan jalleeco waa laxawsi jira, waxa igu jiidaaye.

Dhul jirraban kob aan jimic lahayn, jaan cadde habaasa
Jaljalool abaariyo kulayl, gubaya jiirkaaga.
Hoyguu dugaag jeexday iyo, meelay belo joogto.

Jirriqsiga libaaxiyo dhurwaa, jararacdii yeyda
Jirrabkiyo dhibaatada dadkaa, luqunta loo joojey

Jar cabaadka qaylada baxdiyo, jawda dami weyday
Jahannama cidaahaa ku jira, ee jannada waayey
Dadkaa cadawgu uma jiir naxee, jeedalka u qaaday
Jarihiyo dadkaa caynka iyo baydda lagu jiiday
Addoonsigu dadkaa u jabshee, juuqda laga dhawro
Jimicsiga ma yeelee dadkaa nacabku jeerjeershey

Jitaabada dadkaa looga dhigay, hogaga jeexjeexa.
Afrikada dadkaa aan ku jirin, midabba waa jaade
Dadkaa jecel xornimo aan lahayn, cid uga jeeqaaqda
Dadkaa johoraddoodii la cunay, ee jirraban caawa

Jirka da'ay jareerada la helay, joofafka hillaacay
Tog soo jabay waxaa wabi jimbacan, gawga sare jooga
Ubaxyada dul joogiyo dhirtaa, joofku wada laacay

Naxariista aan jeelayee, araga soo jiita

Dadka wali abaar uga jiree, juuca ku idlaaday
Jiljiladiyo seedaha dadka jilicsantii belay
Jeebbada dadkaa lagu xiree jilibku naafoobay
Dadkaa qodaxda jiiqjiiqlaha ah dhinaca loo jiifshey
Jirrabkuu gurey baday dadkaa haatan laga jeebo

Ee jiirta dheer lagu eryee, jaanta lagu dheelo
Carruurtooda nimankaa la jaray, uur ku jirahooda
Tallabada dadkaa noo jiree, ina jalleecaaya
Een cadawga jiiqsaday lahayn cid uga jeemaarta
Cidda kaliya ay jirinayaan jalle waa innagee
Aan ku jimicsannee maan jihad jeeniga u qaadno

Afartaas sidii dhane la jilay, jaan aan soo shubay dheh

Naxwihiin aan kala joojin jiray qaar ka soo jabay dheh
Badweyn laabta jiiftiyo murtida aan la joogsaday dheh

Afar kalena soo jire yaqaan jeeska aan nahay dheh
Jabhaduhu ka badan ciddayada CHINA oo kale e
Kun majeestayaaloo fadhiga jalalamle u roora
Kun jilbaha ku siqa kuman jinniga jiifa ku eryooda
Kun jaan rogaya iyo kuman jigraha jeeni qaarsanaya
Kun ruuxood ku jiiriyo kumanaan cidi u joogaynin

Kun jeex qodaya iyo kuman dhufays jiitinta u riixa
Kun jaajuurka kaaraha qafilan jiita ubucdiisa
Kun culayska jiitiyo cuntada kuman jidiin qaada

Kun rasaasta joogiyo ka rida jeebanlow orodka
Kun dabayshu aanay joojin Karin jaf iyo boodkooda
Kun jibaaxa keymaha jiqda ah jeerin iyo qootin

Kun wardoonka lagu jeebayoo shaygii jira keena

Jilbiskiyo abeesada kun cuna kuman aan juuc taaban
Kun jibaada kun buur kala jabshiyo jidadka qaar gooya

Kun qof jooga ruuxiisa jara kumaan la jeedaalin
Jid cad iyo kun weerara halkii cadawgu uu joogo
Jiscinkiyo kun aan rabin biyaha horey u sii jeeda

Kun badweynta jaanka ah dhex mara uurka kuman jiifa

Maraakiibta joofka ah kun wada, heegan kala jaad ah
Kun dabaasha joogjooglaha ah jiif isugu tuura

Kun jillaabta soo daba kalluun jeenan laga qaado
Kun hawada dayaaraadka jaran jalam ka soo daaya
Kun cir jiira kun jeegaanta sare caad jawiga saara

Kun jal jiisa kii soo jabiyo, jiiska luga beela
Kun dawada ninkii jalaf ku dhaco dhiigga baxa jooja
Kun geel jire ah kun yoocada jabsada, jidibyo qaar haysta

Jinawgiyo kun caanaha barxada liifka kuman jooja
Kumayaal uneexada jartoo col u jibaadaaya
Kun jimbaca dhex seexdiyo kuwaa jiida xarigiisa

Kun wadaan jileeyoo darkii gawga sare jooja
Jabadkiyo kun jidadkiyo yaqaan meesha cidi joogto
Jidbaaliyo kun beerdhiga ogaa jananadii dhuuntay

Kunkii koofil soo jaray gacmehee juuq u oran waayey

Kuman jirac ah kun ciil jaray dibnaha, kuman aan jeefaafin
Ilaa guban kun soo joogay oo seeddo jilifoowday

Kun geenyo jeedliyo rakuub kuman ku jeeraada
Kun jihaadda kun loo jarabariyo jalle wada dhaarsan
Kun juubaha halgaaddiyo warmaha juqaaleeya

Kuman xalane lagu soo jabshoo wada jamaahiira
Kun tacliinta jiitoo cilmiga meelo sare jooga
Kuman shaqadu waa kala jirtaa, nabadda jeedaasha

Kun la jaqayo kun jeeniga ku sida hooyo jiir adag ah
Kun jarmaada kuman hilibka jara suuqa kuman jooga
Kun jallato gada baalashlaha jaadka kuman cayrsha

Dillaal xariggu qoorta ugu jiro darwal jiimbaarsan
Kun jaamici ah kun muusiga jimcaha jaanta ka ciyaara
Kun jalaadka qaatiyo dikriga kuman xadro u jeeban

Kun farsamada laga soo jirshoo biraha jeexjeexa
Kun jannaale beeraha jafiyo jilib kuwaa jooga
Intaas oo kun oo wada jirtoo dhinac ka soo jeedda
Halka ay ku jeestaan ma karo cadawga joogaaye
Cayrinka nimankaa jaqaa jaanta sii rogane
Jigjiga iyo ilaa adari bay jagacda sii hayne

Jeexyada wardheer qaar kalaa haadda loo jarine
Markaasaa dadkii luunku jaray uu jir roob degiye
Jirrabkiyo dhibkii bay ka bixin jeelkii gaalada e'

Markaasaa farxadi waa jannee jiib naloo tumiye
Calankeenna aan jecelnahaa jawhar sii noqone
Dadkaa ay abaaruhu jareen xaasaskaa jilicsan
Marki saaka joof lagu furiyo wabiga jiinkiisa
Isticmaar jawaabtuu sugaa waa jug qaraxeede
Ninkay nabaddu jeenan u tahay ha iska xulo jiide

Inkastoo dhaqqaalaha jiraa jiilyar yahay manta
Qoonki ilaahay la jiro maalintii jiganta
Jirrabaada waa kii kabaxa juubajuubaha e'
Ilaad aragto jaar kuu qosloon jiidhka kala haysan
Calankii shisheeyaha jirsaday jaalle lagu waaye
Aan ku jimicsannee maan jihad jeeniga u qaadno

C/QAADIR XIRSI YAMYAM 1977